

Badhasaabka Walz wuxuu ku Dhawaaqayaa Tallaabooyinka Xiga ee COVID-19 si Mudnaanta loo Siiyo ku Soo-celinta Carruurta Iskuulka, iyo Ilaalinta Kartida Isbitaalka

Badhasaabka ayaa sidoo kale saxiixay sharci \$ 216 milyan oo taageero toos ah loogu talagalay ganacsiyada yaryar iyo 13 usbuuc kordhinta dheefaha shaqa la'aanta

Arbacadii, Diseembar 16, Badhasaab Walz wuxuu ku dhawaaqay waddo loo maro tallaalka safmareenka COVID-19 kaas oo gacan ka geysanaya u dhowaanshaha tallaalka. Waxay ku sameysaa iyada oo la sii wado ilaalinta kartida isbitaalka iyadoo mudnaanta la siinayo sidii carruurteenu ugu soo noqon lahaayeen fasalka isla markaana u taageeri lahayn tayada noloshu reer Minnesota. Ku dhawaaqista kadib, Badhasaabka ayaa saxiixay sharci \$ 216 milyan oo gargaar dhaqaale ah oo lagu taageerayo ganacsiyada yaryar iyo shaqaalaha uu saameeyay safmareenku.

Carruurta dhigata dugsiga waa muhimadda koowaad ee caafimaadka dadweynaha. Dugsiyadu waxay door muhiim ah ka ciyaaraan caafimaadka, ladnaanta, iyo waxbarashada carruurta Minnesota. Iyadoo lagu saleynayo fahamka fayaska ee soo if-baxaya ee Minnesota, carruurta yaryar ayaa la rumeysan yahay inay u nugul yihiin dhibaatooyinka halista ah ee COVID-19. Gobolka ayaa sidoo kale waxbadan ka bartay guusha laga gaaray goobaha kale sida loo yareeyo suurtagalnimada ku-faafitaanka iskuulada. Badhasaabku wuxuu cusboonaysiiyay Qorshaha Barashada Nabdoon si markaa laga bilaabo Janaayo 18, 2021, dugsi kasta oo hoose oo ku yaal daafaha gobolka uu u doorto inuu ku shaqeeyo qaab barasho qof ahaaneed illaa iyo inta ay awoodaan inay hirgeliyaan istiraatiijiyado dheeraad ah oo khafiifin ah, oo ay ku jiraan bixinta iyo ka rabista shaqaaluhu inay xidhaan dabool-waji iyo maaskaro oo ay qaataan iska tijaabin joogto ah.

Badhasaabku wuu ogyahay in la-qaadashada waqti tayo leh kuwa la jecel yahay iyo jimicsi joogto ahi ay muhiim u yihiin caafimaadka maskaxda iyo shucuurta qoysaska gobolka oo dhan. Badhasaabka ayaa dhowr jeer wax ka-beddel ku sameeyay xayiraadaha jira oo u oggolaan doona dadka reer Minnesota inay u janjeeraan caafimaadkooda maskaxeed:

- **Kulamada Bulshada:** Kulamada gudaha lama amaanayn, laakiin reer Minnesota waxaa laga yaabaa inay gudaha la galaan hal qoys oo kale ilaa 10 qof. Hadday bannaanka tahay, kulammada bulshada waxaa ku jiri kara ilaa laba qoys oo dheeri ah (saddex wadar ahaan) ugu badnaan 15 qof, laga bilaabo Diseembar 19. Maaskaraynta iyo kala fogaanshaha bulshada ayaa si xoogan loo dhiirigaliyay.
- **Goobaha jimicsiga iyo istuudiyaha jirdhiska :** Wuxuu u furmi karaa jimicsi shaqsiyeed boqolkiiba 25 karti ahaan, ama 100 qof ugu badnaan, oo wata maaskaro iyo 12 fuudh oo kala fogaansho jireed ah oo udhexeeya shakhsiyaadka. Tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan fasalada kooxeed, oo bilaaban kara 4ta Janaayo, ayaa soo socota.

- **Ciyaaraha dhalinyarada iyo qaangaarka:** Hawlaha waxay dibu bilaabmi karaan Janaayo 4. Tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan dibu bilaabidda dhaqamada ayaa soo socda. Intaa waxaa sii dheer, nashaadaadka isboorti ee abaabulan kuma xirna xogta kiisaska degmada ama qaabka waxbarashada dugsiga.
- **Goobaha madadaalada bannaanka :** Ku fur 25 boqolkiiba karti, illaa 100 qof markiiba. Haddii cuntada iyo cabbitaanka la bixinayo, dhammaantood waa inay fadhiistaan.
- **Meelaha madadaalada gudaha,** goobaha munaasabaduhu ka dhacaan, iyo xarumaha la midka ah way xiran yihiin illaa Janaayo 11.
- **Baararka, makhaayadaha, iyo meelaha khamriga lagu sameeyo ayaa** sidoo kale uxiran ka-xuntaynta gudaha, laakiin waxaa laga yaabaa in loo furo adeegga banaanka oo ah boqolkiiba 50 ama ilaa 100 qof. Miis kasta wuxuu ku eg yahay afar qof, miisaskuna waa inuu u dhexeeyaa ugu yaraan lix fuudh .

Maaddaama isbitaalada ay weli ka walwalsan yihiin kartida ay u leeyihiin in ay daaweeyaan dhammaan kuwa jirran, Guddoomiye Walz wuxuu sii wadaa dadaallada looga hortagayo faafitaanka bulshada ee COVID-19 iyo taageeridda geesiyaasheena safka hore. Dadka reer Minnesota waa inay sii wadaan taxaddarrada ay kula dagaalamayaan faafidda fayraska ee bulshadooda - xiro maaskaro, ku dhaqmaan masaafada bulshada, iyo in la baaro haddii ay xanuun dareemaan.